



Macluumaadka sunta ee Milkiilayaasha Guriyaha

Waxaa la cusbooneysiisay
3/25/26

Waa maxay sharciga sunta ee Massachusetts?

- Sharciga sunta wuxuu u baahan yahay in laga saaro ama la daboolo wixii khatar ah ee sunta riinjiga ku keena guri kasta oo la dhisay ka hor 1978 halkaas oo uu ku noolyahay cunug ka yar 6 sano.
- Milkiileyaasha guriga iyo masuuliyiinta guriyaha labaduba waxey mas'uul ka yihiin inay u hoggaansamaan Sharciga sunta. Waxaa looga baahan yahay inay guriga ka dhigaan mid aan lahayn sun haddii uu jiro cunug ka yar yahay 6 sano oo halkaas ku nool.

Sideen ku ogaan karaa in gurigaygu leeyahay sun?

- Barnaamijka Ka Hortagga Summowga Ilmaha ee Massachusetts wuxuu diiwaangeliyaa taariikhda sunta ee guriyaha iyo xanaaada caruurta ee la dhisay ka hor 1978. Fiiri taariikhda mass.gov/info-details/find-your-homes-lead-history.
- Haddii gurigaaga la dhisay ka hor 1978, waxaa laga yaabaa inuu leeyahay sun. Weydii kormeere sun ee gaar ah ama Barnaamijka Ka Hortagga Summowga Ilmaha ee Boston si aad loo baaro gurigaaga.
- Ogow haddii khadka adeegga gurigaaga laga sameeyey sunta adoo ka hubinaya khariidadda adeegga Guddiga Sumoowga ee Biyaha iyo Bulaacadaha Boston ee www.bwsc.org ama wacaya 617-989-7888.



Ma u diidi karaa inaan qof ka kireeyo ama ka saaro sababo la xiriira sunta ee gurigeyga?

Maya. Sida ku cad sharciga Massachusetts iyo Sharciga Guryeynta Cadaaladda ee Federaalka, ma u DIIDI kartid inaad ka kireysid kireystayaasha ama kama saari kartid haddii ay carruur leeyihiin ama haddii gurigu leeyahay sunta. Ka milkiilaha guriga ahaan, waxaad mas'uul ka tahay hagaajinta khatarta rinjiga sunta ee guriga.

Haddii aad u diido inaad ka kireyso ama aad ka saarto qof sabab la xiriirta iney leeyihiin carruur ama sabab la xiriirta in gurigu leeyahay sun, waxaa loo tixgeliyaa takoorid. Haddii aad sidaas sameyso, waxaa lagugu soo oogi karaa talaabo sharci ah. Ka wac Xafiiska Guryaha iyo Sinnaanta ee Boston 617-635-2500 haddii aad wax su'aalo ah qabtid.



617-534-5965



1010 Massachusetts Ave
Boston, MA 02118



boston.gov/bphc-leadpoisoning



leadpoisoning@bphc.org

Waxaan leeyahay khad adeeg oo sunta ah ee gurigeyga. Maxaan sameeyaa?

Ku beddel khad adeeg oo cusub. Guddiga Biyaha iyo Bulaacadaha ee Boston (617-989-7888) wuxuu bixiyaa deyn aan dulsaar lahayn iyo maalgelin ku wajahan qiimaha beddelka.

Wuxuu gurigeyga leeyahay rinji sunta ah ee gurigeyga. Maxaan sameeyaa?



- ① Aqoonso ilaha lacagta si aad u bixiso lacagta lagu saaraayo sunta. Waxaa jira ilo ku caawiyaan.
 - Ururka Badqabka Sunta Boston: Waxay bixisaa deeqo, oo leh maalgelin lagu go'aamiyo tirada cutubyada gurigaaga. Wixii macluumaad dheeraad ah, wac 617-635-0190.
 - Kabka Canshuurta ee Lagu Saaro Sunta Guryaha Massachusetts: Adigoo haysta warqad u hoggaansanaanta sun saarista, waxaad heli kartaa deyn canshuur marka aad soo gudbiso canshuurtaada gobolka ee cutub kasta oo sunta laga saaray. Wixii macluumaad dheeraad ah, wac 617-887-6367.
 - Ururka Saarista Sunta Guryaha: Waxay bixisaa maalgelin jaban si loo saaro rinjiga sunta. Wixii macluumaad dheeraad ah, wac 617-843-6432.
 - Wixii macluumaad dheeraad ah oo maaliyadeed, ka eeg Websaydhka Ka Hortagga Summowga sunta ilmaha ee Massachusetts [mass.gov/info-details/learn-about-financial-assistance-for-deleading](https://www.mass.gov/info-details/learn-about-financial-assistance-for-deleading).
- ② Ka fikir inaad adigu sameyso. Si loo waafajiyo sharciga, milkiilayaasha guriga waa inay ka saaraan ama daboolaan dhammaan khataraha sunta ee guriga. Mulkiilayaasha guryaha ee u tababaran oona idman waxay sameyn karaan sun saaris halisteeda yartahay. Wax badan ka baro adigoo booqanaya www.mass.gov/deleading-on-my-own.
- ③ Kireyso xirfadle sunta saar oo si sax ah u tababaran oona shahaadeysan. Ka eeg liiska sunta saarayaasha [mass.gov/finding-and-removing-lead](https://www.mass.gov/finding-and-removing-lead).



Dadka aan haysan tababarka saxda ah waxay halis sunta ah u gelin karaan dadka meesha degan. Ka wac Guddiga Caafimaadka Dadweynaha Boston 617-534-5965 ama Waaxda Heerarka Shaqada 617-626-6975 haddii aad walaac ka qabto shaqada aan la fasaxin ee la qabanayo.